

## Somaliland international election observation mission

**Goobjoogayaasha Caalamiga ah ee Doorashada Madaxtooyada Somaliland ee 13 November 2017 oo soo gaadhay Somaliland, rajaynaya Doorasho ku dhacda si guul iyo nabadgelyo ah.**

Iyada oo ay inagu soo fool leedahay doorashada saddexaad ee Madaxtooyadu oo dhacaysa 13 ka November 2017, waxa Hargeysa soo gaadhay horraantii 60 xubnood oo ah goobjoogayaasha caalamiga ah.

Goobjoogayaasha Caalamiga ah ee doorashooyinka waxa marti geliyay Guddiga Doorashooyinka Qaranka waana maalgeliyay dawladda Ingiriiska. Goobjoogayaashu waxa ay u qabanayaan hawshooda si waafaqsan shuruucda caalamiga ah ee goobjoognimada doorashooyinka iyada oo awoodda la saarayo dhexdhexaadnimada goobjoogenimada.

Goobjoogayaasha caalamiga ahi waa markii afraad ee ay goobjoog ka noqdaan kana war bixiyaan Somaliland laga soo bilaabo 2005 tii. Iyada oo ay tahay doorashadii madaxweyne ee saddexaad (marka la eego codbixintii 2003 iyo 2010), waa doorashadii ugu horraysay ee la adeegsaday nidaam cusub loo adeegsaday diiwaangelinta codbixiyayaasha, taas oo ka dhigan markii ugu horraysay ee habka casriga ah ee aqoonsiga indhaha iyo faraha loo adeegsado doorashooyinka Afrika. Doorashada waxa dib loo dhigay ka dib xaalad abaareed oo aad u ba'an oo dalka la soo deristay sannadihii 2016 iyo 2017, waxaanay hadda ku soo beegantay xilli ay Somaliland soo jiidatay maalgashi xagga kaabayaasha ah oo aad u wayn oo ay ke helayso bariga dhexe iyo iyada oo dhinaca kele Soomaaliya ay dadaal ugu jirto sidii ay dib ugu dhisi lahayd nidaamkii siyaasadeed ee burburay. Goobjoogayaasha caalamiga ahi waxay ay rajaynayaan in hirgelinta nidaamka diiwaangelinta codbixiyayaashu uu wax ka tari doono arrimihii ka soo baxay doorashooyinkii hore, waxa aanay filayaan in ay sii wataan hawlahooda.

Goobjoogayaasha Caalamiga ah waxa hoggaaminaya Qaybta Qorshaynta Horumarka ee Jaamacadda UCL iyo ururka Somaliland Focus UK. Maareeyayaasha kooxda waxa ay abla-ablayn doonaan dhamaan arrimaha la xidhiidha muddada ka horraysa doorashada, marka lagu daro sida ay xisbiyada siyaasaddu ay u geli karaan goobaha ay ka ololaynayaan, sinnaanta ay u leeyiniin adeegsiga warbaahinta, iyo nidaamyada loo dejiyay shaqaalaysiinta qaybinta qalabka doorashooyinka, codbixinta lafteeda iyo tirinta codadka. Kooxda goobjoogayaasha oo dhamaystiran oo ay ku jiraan goobjoogayaal ka kala socda 24 waddan waxa ay si buuxda dalka u soo wada gaadhi doonaan 8 da November, waxa aanay dalka ka dhoofi doonaan 16 ka November iyada oo ay jiri doonto koox tiro kooban oo dalka ku hadhi doonta si ay goobjoog uga ahaadaan muddada doorashada ka dib oo ay ku jirto xilliga ku dhawaaqista natiijadu. Goobjoogayaasha caalamiga ahi waxa ay goobjoog ka noqon doonaan goobaha cod bixinta dhamaan lixda gobol ee Somaliland, waxa aanay soo saari doonaan warbixintooda ugu dambaysa qaybta hore ee sannadka 2018.

Dr. Michael Walls oo ka tirsan qaybta horumarinta ee jaamacadda UCL, ahna madaxa Goobjoogayaasha Caalamiga ahi waxa uu yidhi:

*“Doorashadani waxa ay Somaliland u noqon doontaa mid taariikhi ah iyada oo ay tahay markii ugu horraysay ee ee Madaxweynaha talada hayaa aanuu tartanka ku jirin. Sidi caadadu ahayd, waxa adkayd in la isku habeeyo shaqaalaysiinta kooxo kala duwan, doorasho ku dhacda si nabadgelyo iyo sax ah waxa ay ka dhigan tahay tallaabo muhiim ah oo hore loogu qaaday dhanka dimuqraadiyadda taas oo calaamad aad u wanaagsan u ahayd siyaasadda Somaliland 15 kii sannadood ee la soo dhaafay”.*

### **Qoraal ku socda Saxaafadda**

1. Haddii aad rabtid in aad waraysi dheeraad ah la yeelato mid ka mid ah kooxda isku xidhka goobjoogayaasha, fadlan la soo xidhiidh Conrad Heine (Isku xidhaha xidhiidhka warbaahinta ee Goobjoogayaasha Caalamiga ah) adigoo kala xidhiidhaya 0634685255 ama [ieosomalilandmedia@gmail.com](mailto:ieosomalilandmedia@gmail.com). Sawirro ayaa iyagana lagu hayaa.
2. Somaliland waxa ay ku dhawaaqday madaxbannaanideeda ay ka qaadatay Soomaaliya sannadkii 1991 ka dib markii ay burburday dawladdii Soomaaliya. Ilaa hadda si caalami ah looma aqoonsan.
3. Warbixinnadii doorashooyinkii hore (marka lagu daro diiwaangelintii codbixiyayaasha) waxa laga heli karaa mareegta Somaliland Focus UK: [www.somalilandfocus.org.uk](http://www.somalilandfocus.org.uk)

